JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA

*Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare*

جمهورية الصومال الفيدرالية

وزارة التربيـــة والثقافة والتعليـــم العالي

Somali Federal Republic

*Ministry of Education, Culture & Higher Education*

**Tirada Tixraaca: 113**

**Taariikhda soo bixidda: 18/03/2018**

**Taariikhda uu xirmayo: 28/03/2018**

Faahfaahin Shaqada la rabo in la qabto:

1. Naqshadaynta imtixaanka qaran ee fasalka 4aad ee dugsiga sare
2. Daabicidda Imtixaanka tobanka maado ee fasalka 4aad ee dugsiga sare
3. U-baqshadeynta imtixaanka maaddo walba labaatan/labaatan xirmo

Waqtiga lagu qabanayo hawsha: waa mudo 25 casho gudohood ah oo ka bilaabanaysa1/4/2018 kuna eg 25/4/2018.

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxay halkaan ku soo bandhigeysaa tartan qandaraas daabicidda imtixaannada fasalka 4aad ee dugsiga sare ee sannad dugsiyeedka 2017/2018. Bandhiggan ujeedkiisu waa xulashada shirkadda ugu habboon ee daabici doonta imtixaanka qaran sida kor ku xusan. Haddaba waxaa lagu wargelinayaa dhammaan shirkadaha madbacadaha awooda in ay daabici karaan imtixaankan qaran oo gaaraya 1.4 milyan oo warqadood muddo 25 cisho gudahooda ah, in ay soo gudbiyaan dalabkooda ku aaddan howshaas iyagoo buuxinaya shuruudaha soo socda:

1. Dalabka cid kasta oo u tartameysa hawshaan waa in xafiiska maamulka iyo maaliyadda ay qoraal ahaan u soo gaarsiiyaa taariikh aan ka danbayn 28/03/2018 4pm waqtiga Muqdishu.
2. Dalabkasta waa in uu ka kooban yahay:

    a. Sababta ay shirkadda u dooneyso in ay qabato shaqadaan
    b. Awoodda shirkadda u leedahay qabashada shaqadan dad iyo agab ahaan
    c. Waqtiga ugu gaaban ee ay ku qaban karto,
    d. Waxa ay ku xaqiijineyso ammaanada imtixaanka qaran oo faahfaahsan
    e. Qiimaha ay ku qaban karto

f. Haddii loo baahdo in ay ku dhex daabici karto xarun wasaaraddu qoondeeysay.
g. Imtixaanka waxaa la siinayaa hal shirkad oo aan cid kale la wadaagi karin daabicistiisa.
h. Shirkaddaas waa in ay keligeed fulisaa daabicidda.
i. Waxaa ka reebban in shirkadda heshay imtixaanka ay meel kale oo muqdisho ka baxsan ku daabacdo.
j. Shirkadaas waa in ay leedahay ugu yaraan 3 sano oo khibrad shaqo ah.

Shirkadda ku guuleysata waxaa la siinayaa heshiis rasmi ah oo qoraal ah. Si shirkad loogu tixgeliyo in codsigeeda la aqbalay waa in shuruudaha kor ku xusan ay soo buuxisaa iyadoo raacaysaa habraaca hoos ku qoran:

1. Dalabka waa in uu ku qoran yahay warqad leh summadda shirkadda, saxiixa maamulaha iyo taariikhda dalabka.
2. Nuqul ka mid ah shatiga ganacsi ee shirkadda leedahay oo ay bixisay dowladda Soomaaliya.

Go'aanka xulashada waxaa iska leh wasaaradda, waxaana lagu salaynayaa shuruudaha soo socda:

1. Awoodda shirkad ee xaqiijinta ammaanka imtixaanka
2. Tayada daabacadda imtixaanka
3. Kalsoonaanta in imtixaan lagu daabaco watiga loogu talo galay
4. Qiimaha
5. Qalabka shirkadda u yaalla
6. Sumcadda ay shirkaddu ku dhex leedahay bulshada.

Dalabkaan waxaa u tartamaya oo kaliya madbacadaha wax daabaca, leh dad iyo agab madbacadeed. Dalabkaan waxaa ka reebban dallaal ama shirkad dhexe oo adeegsata madbacad kale.

Imtixaanka waxaa shuruud u ah:

1. Warqadda boon ah ugu yaraan 80mg
2. Waa in uu ku qoran yahay warqad A3
3. Qad madow asal ah.
4. Labada dhinac

Goobta: Xarunta Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare

Laamiyaraha Zoobbe

Xafiiska Maamulka iyo Maaliyadda

KAMA DANBAYS: 28/03/2018 4PM